

لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ
الْحَمْدُ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ

Laa'ilaaha ilaa Allah waxdahuu, laa shariika lahuu
lahu al-mulku wa lahu al-xamdu, wahuwa calaa
kulli shay-in qadiir.

Ilaah xaq lagu caabudo majiro Allah mooyee,
waana kalidii, mana jirto cid la wadaagta
cibaadadiisa. Isaga ayey u sugnaatay mulkiga iyo
mahadduba, waana Alle wax kasta awooda.

الحمد لله وسبحان الله ولا إله إلا الله والله
أكبر ولا حول ولا قوة إلا بالله

Al-xamdu lilaah, wa subxaanaAllah, wa laa'ilaaha
ilaa Allah, wa Allahu akbar, walaa xawla walaa
quwwata ilaa billaah.

Ilaahbaa mahadda iska leh, xumaan iyo nuqsaana
wuu ka dheeryahay, Ilaah xaq lagu caabudo
majiro isaga mooyee, Ilaahbaa wayn, xeelad iyo
awoodna majirto oo aan ka ahayn ta Ilaahay.